

## WARBIXINADA KORMEERKA

Booqashada kormeerka ka dib, warbixin ayaa la qoraa waxaana laga yaabaa in lagu daabaco websaydkeenna, [www.hiqa.ie](http://www.hiqa.ie).

Waxay sharxaysaa waxyaabaha kormeerka lagu ogaaday waxayna bixineysaa qorshaha waxqabad ee isbedelada loo baahan yahay, halkay lagama maarmaan ka tahay. Dadka deggan iyo xubnaha dadwaynuhu waxay ogaan karaa qaybaha adeega ee fiican iyo kuwa horumarin u baahan.

## NALA SOO XIRIIR

Wixii macluumaad dheeraada ah ama si aad ula hadasho xubinshaqaalahayaga ka mid ah, waxaad naga soo wici kartaa taleefanka (01) 814 7400 ama iimayl noogu soo dir [info@hiqa.ie](mailto:info@hiqa.ie). Waxaad sidoo kale waraaq noogu soo diri kartaa:

✉ **HEALTH INFORMATION  
AND QUALITY AUTHORITY,  
SMITHFIELD,  
DUBLIN 7,  
D07 E98Y.**

☎ **+353 (0)1 814 7400**

✉ **[INFO@HIQA.IE](mailto:info@hiqa.ie)**


🌐 **[WWW.HIQA.IE](http://www.hiqa.ie)**



An tÚdarás Um Fhaisnéis  
agus Cáilíocht Sláinte

## KU SAABSAN KORMEERKA ADEEGYADA HOYGA ILAALINTA CAALAMIGA AH

Somalian



## KU SAABSAN HIQA

Haayada Macluumaadka iyo Tayada Caafimaadku (HIQA) waa urur madaxbannaan, oo loo sameeyay in lagu horumariyo tayada iyo badbaadada adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee Ireland intooda badan.

Waxaanu la soconaa badbaadada iyo tayada adeegyada isbitaalada, guryaha xannaaneynta iyo guryaha lagu daryeelo caruurta iyo dadka naafada ah.

Waxaanu sidoo kale kormeernaa xarumaha hoyga ilaalinta caalamiga ah (adeega tooska loo baxsho). Taasi waxay la macno tahay in kormeerayaasha HIQA soo booqdaan adeegyadaas si ay u hubiyaan inay aamin yihiin oo ay buuxiyeen shuruudaha heer qaran.

## SHURUUDAHA HEERARKA QARAN

Iyadoo ka jawaabaysa codsiga Wasaaradda Caruurta, Sinnaanta, Naafada, Ka Qaybgelinta iyo Dhalinyarta, waxay HIQA kormeeraysaa adeegyada hoyaadka ee la siiyo dadka ku jira nidaamka ilaalinta waxana la barbar dhigayaa Shuruudaha heer qaran ee adeegyada hoyaadka ee la siiyo dadka ku jiraa nidaamka ilaalinta.

Waxa jira shuruudo heer qaran ah oo degsanaa illaa 2019 waxana laga soo akhrisan karaa websaydkeena [www.hiqa.ie](http://www.hiqa.ie).

## MAWDUUCYADA SHURUUDAHA HEER QARAN

Shuruudaha heer qaran waxay leeyihiin 10 mawduuc oo ay ku jiraan maamulka xarunta iyo shaqaalaha, u diyaargarawga xaaladaha degdegga ah, iyo in dadka xarunta deggan dhibaatooyinka laga ilaaliyo. Shuruudaha heerarka waxay sidoo kale dejiyaan heerka tayo ee laga filayo hoyga dadka la siinayo iyo weliba sida dadka xarunta deggan loo daryeelo loogana taageero noloshooda maalinlaha ah, khaasatan dadka taageerada gaarka ah u baahan.

## KORMEERRO

Waxaanu kormeernaa hoyga la siiyay dadka ku jira nidaamka ilaalinta si aanu u eegno in adeeg bixiyuhu buuxiyay shuruudihii heer qaran. Kormeerada HIQA ee goobuhu waxay kaalmo ka geystaan in:

- dadka xarunta deggan wax laga waydiiyo sida nolosha halkaasi tahay
- dadwaynaha lagu wargeliyo tayada iyo badbaadada adeegyada la siiyay iyo
- in horumarin laga sameeyo meelaha looga baahan yahay.

Kormeeradayadu waxay noqon karaan kuwo la sii shaacshay ama kuwo aan la shaacin. Waxaanu dedaal kasta gelin doonaa inaanu ixtiraamno hab-nololeedka dadka xarunta deggan iyo inaanu yareyno khalkhal gelinta noloshooda caadiga ah.

Inta kormeerku socdo waxaanu:

- la hadli doonaa dadka xarunta deggan, shaqaalaha iyo maamulayaasha
- uruurin doonaa kuweeshineerada la buuxshay
- dib u eegi doonaa dukumeentiyada, sida siyaasadaha
- dhex lugayn doonaa dhismayaasha, oo fiirsan doonaa nolosha caadiga ah ee maalinlaha ah.

